



## Iskuulada dadweynaha ee Faribault, Arjiga isdiwaangelinta Summer STEAMka.

**Kumaa:** Ardayda da'dooda tahay 4 sanno ilaa kuwa galayo 12aad ee sannad dugsiyeedka 2021-2022.

**Waa maxay:** STEAMka waa barnaamij soconaya **sagaal (9) usbuuc** kuna jihaysan barnaamijka xagaaga oo ku wajahan kobcinta xirfadaha ardayda ee dhanka Sayniska, Teknolojiyada, Injineeriyada, Farshaxanka, iyo Xisaabta. Quraac iyo qado ayaa la bixini doonaa oo lacag la'aan ah.

**Gormaa:** **Juun 14da** ilaa **Agoosto 12da**  
Isniinta ilaa Khamiista  
**8:00** subaxnimo – **3:00** galabnimo

**Xagee:** Goobta lagu qabanayo waa lasoo go'aamini doonaa.

**Waqtiga kama dambeysta arjiga: Maarso 24, 2021-** Codsiga waxaa loo gudbin karaa macalinka cunugaaga, xoghayaha/gacan yaraha dhismaha, ama Xafiiska Degmada.

**Baska:** Waxaa diyaar ah gaadiidka kana soo qaadi kara goobo kala duwan oo laga qaado ama lagu dejinayo goobo fara badan ee Faribault. Haddii ilmahaagu u baahan yahay gaadiid, **foomkan waa in la soo celiyaa ugu dambayn Maarso 24, 2021.** Ardayda is diiwaangelisa wixii ka dambeeya Maarso 2021 **looma dammaanad qaadi doono** adeegyada gaadiidka. Dhamaan sharciyada baska ee hada jira ayaa lagu dabaqaa, ooy kujiraan dherarka hal mayl gaadiid.

**Sharciga Imaanshaha:** joogteynta iyo imaanshaha marwaliba ayaa ah filashada kaqeybgalayaasha barnaamijka.

**Sharciga qaadashada Ardayda:** Waalidiintu waxaa laga filayaa inay soo qaadaan cunugooda **3:00** galabnimo haddii ilmahaagu usan raaceyin baska.

Buuxi arjiga oo u gudbi xafiiska iskuulka ilmahaaga. Fadlan aqri bogga labaad ee arjigan kahor intaan buuxin foomka bogga 3-aad. Xaqiijinta diiwaangelinta ayaa boostada lagugu soo diri doonaa bisha Abriil 15da ku saabsan Macluumaadka baska ee la raacayo.

**Ogeysiinta aqbalida, macluumaadka dhismaha iyo baska uu raacayo ayaa lagu soo diri doonaa.**

### Oggolaanshaha webka/sawirka / fiidiyowga.

Ardayda / qoysaska waxaa lagu dari karaa sawir, muuqaal, iyo fursadaha khadka tooska ah ee la xiriira barnaamijyada. Qaar ka mid ah sawirada / fiidiyowiyada waxaa lagu daabici karaa ama lagu arki karaa joornaalada, telefishanka ama iskuulka, iyo daabacaadaha bulshada. Sawirrada ardayga iyo qoyska iyo fiidiyowiyada ayaa waliba lagu dari karaa websiteka degmada iyo bogagga warbaahinta bulshada. Si aad uga baxdid fursadahaan xayeysiinta ah, warqad ugu dir isuduwaha adeegyada ardayda, Brenda Pittman, xafiiska degmada, 710 17th St SW, PO Box 618, Faribault, MN 55021.

**Macluumaadka Xiriirka:** Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan kala xiriir Iliana Piñon taleefanka 507-333-6005. Mahadsanid!

Kani waa barnaamijka waaxda Waxbarshada Minnesota oo ay tahay in ardaydu la kulmaan (shuruudaha Minnesota, qaybta 124D.68, qodobka 2). Adigoo ka diiwaangalinaya cunuggaaga barnaamijka STEAMka, Qorshe waxbarasho loo diyaarshay (CLP) ayaa loo abuuri doonaa cunuggaaga oo ku saleysan ujeedooyinka tacliinta ama dareenka bulshada iyo horumarka ayaa dib loogu eegi doonaa.

### **Fadlan la soco shuruudaha soo socda ee ay tahay inay ardaydu buuxiyaan si ay isugu diiwaangeliyaan barnaamijka “Summer STEAMka”:**

- Awood u leh inuu raaco tilmaamaha hadalka iyo tilmaamaha ay bixiyaan shaqaalaha STEAM iyo kormeerayaasha;
- Muujini kara ciyaar iskaashi oo ku habboon da'diisa iyo wada shaqeynta dabeecadaha (iwm) qaadashada wareejinta, wadaagida, iwm.) Howlaha yar yar iyo kuwa weynba ee leh kormeerida yar ee dadka waaweyn.
- Awood u leh inuu si madaxbanaan u shaqeyn karo isagoon cid kale dhibeynin markii hawlo shaqsiyeed loo xilsaaray
- Awood u leh inuu si amaan ah oo guul leh oga gudbo hawl hal ah mid kale iyo hal goob oo kale oo kormeerida yar ee dadka waaweynah oo; iyo
- Ka fogaashaha garaacida, haraantida, qaniinyada, iyo kuwa kale ee dagaal gardarrada ah ee loo geysto ardayda kale iyo shaqaalaha.

### **Filashooyinka Gaadiidka STEAMka ee Loo Baahanyahay**

Waa sharciga Minnesota in raacitaanka basku uu yahay mudnaan isla markaana aan ahayn xuquuq. Haddii filashooyinka la fulin waayo, ardaygaagu wuxuu waayi karaa mudnaanta ay u leeyihiin isticmaalka gaadiidka.

### **Waxyaabaha laga filayo raacida baska waxaa ka mid ah, laakiin kuma eka:**

- Ixtiraamida iyo adeecida wadaha baska marwalba.
- Ixtiraamida ardayda kale iyo hantidooda marwalba. Ubanee kuwa kale ee u baahan kursi.
- ka gudub baska hortiiisa 10 feet markaad goynaysid wadada.
- Ka dhig dariiqyada mid furan marwalba
- Ku dhex ilaale gacmahaaga, madaxa, iyo waxyaabaha kale oo dhan baska gudihiiisa marwalba.
- Daaqaduhu waxay ufunan karaan qeyb kale ah, taas oo rukhsad oggolaansho laga heliyo darawalka.
- Waa in aad fadhidaa dhinaca hore ujeedka mar kasta.
- Si deganan ah u hadal oo isticmaal luqadda habboon oo wanaagsan
- Burburinta b
- aska, sida goynta / jeexida kuraasta, waa mamnuuc adag.
- Lama faragelin karo raadiyaha baska, qalabka kontaroolka, ama bixitaanka xaaladaha degdegga ah.
- Fiidiyoowga ama sawir qaadista nooc kasta ha ahaatee waa mamnuuc adag.
- Ma jirto dagaal, dhibaateyn, cabsi gelin, ama fara ciyaarid.

Tallaabooyinka uu arko darawalka baska ama qofka shaqaalaha iskuulka inay yihiin kuwa aan habooneyn, laakiin aan si gaar ah loogu xusin kor waxay sidoo kale keeni karaan in laga qaado ficil edbin.

### **Cawaaqibka /Natijada Gaadiidka.**

**Dambiga 1aad:** Digniinta afka iyo wacitaan taleefanka oo loo dirayo guriga waalidka / mas'uulka

**Dambiga 2aad:** Shan maalmood oo laga joojinayo baska/gaadiidka

**Dambiga 3aad:** Luminta Mudnaanshaha raacista gaadiidka inta ka hartay STEAMka

Darawalka baska iyo shaqaalaha iskuulka labaduba waxay leeyihiin xuquuq ah in laga joojiyo ardayga gaadiidka iyo barnaamijka inta ka hartay sanad dugsiyeedka markay dhacdo hal dhacdo, haddii la go'aamiyo in ay tahay dambi weyn.

**Fadlan u hayso bogga tixraac ahaan.**

Fadlan uhayso boggan tixraac ahaan.



Iskuulada dadweynaha ee Faribault  
2021 Barnamijka Summer STEAMka – Ardayda da'dooda 4  
sanno tahay ilaa 12 aad.



**Ku daabac/qor magaca sharciga ah ee ka muuqda shahaadada dhalashada - FADLAN SI NIDAAMSAN UGU DAABAC/QOR.**

**\*\* FADLAN U ISTICMAAL HAL DIIWAANGELIN CUNUGEEBA - HA KU QORIN LABA MAGAC HAL WARAAQ.**

Magaca dambe ee ardayga	Magaca hore ee ardayga	Magaca dhexe ee ardayga
Iskuulka	Macalinka Fasalka	Fasalka Ardayga
Magaca Waalidka/Mas'uulka	Nambarka Taleefoonka	Nambarka Taleefoonka Shaqada
Magaca xiriirka degdeg ah	Nambarka Taleefoonka	Nambarka Taleefoonka Shaqada

Fadlan buuxi labadaba xulushooyiin ee gaadiidka subaxdii iyo galabtiiba ee cunuggaaga. Arday kasta waxaa loo ogol yahay hal cinwaan oo keliya ah oo subaxdii iyo galabtii ah.

<b>Halka laga qaadayo:</b> <input type="checkbox"/> Guriga <input type="checkbox"/> Daycare	<b>Halka lagu dejinayo:</b> <input type="checkbox"/> Guriga <input type="checkbox"/> Daycare
Magaca qofka day careka: _____	
Cinwaanka Day careka: _____	
Taleefoonka Nambarka day Careka: _____	

Fadlan calaamadee waxyaabaha soo socda kahor intaadan saxiixin:

- Waxaan fahamsanahay shuruudaha ardayda ay tahay inay buuxiyaan si ay ugu xaadiraan barnamijka STEAM xagaaga (oo ku qoran bogga 2).
- Waxaan aqriyey filashooyiinka gaadiidka ee bogga 2aad waxaana dib u eegis kula sameeyey cunugeyga.
- Waxaan aqriyay sharciga degmada ogolaashaha sawir / fiidiyow / websiteka ee bogga 2aad.
- Waxaan siinayaa ilmahayga ogolaansho inuu kaga qeybgalo safarada ee STEAMka.
- Waxaan bixiyey ogolaansho in ilmahayga loo abuurto Qorsho waxbarasho ee loo sameeyey.

Saxiix waalidka/Mas'uulka

Taariikhda

**Caafimaadka:** Fadlan qor wixii baahi caafimaad ee shaqaalaha ay tahay inay ogaadaan oo ku saabsan cunugaaga: